



# ISKAASHATADA MAALGELINTA EE MIDWAY

## WAA MAXAY

GKu darmo! Iskaashatada Maalgelinta ee Midway waa iskaashato cusub oo ay hogaamiyaan ayna maamulaan urur xubinimo ku salaysan oo ka soo aruuriya lacag dadka deegaanka si loogu maalgashado dhul ganaci oo ku yaal xaafada Midway.

Gudiga dhaqangelinta ee hadda jira waxaa soo abaabulay hay'ada Hamline Midway Coalition waxaan ku jira qaar ka mid ah dadka deegaanka, ganacsato iyo shakhsiyad ku nool kana shaqeeya xaafada Midway.

## CIDDEE

## GOORMA

Iskaashatada hawsheeda waxaa si rasmi ah loo bilaabi doonaa dayrta 2021. Talaabadda xigtaa waa in la xusho Golaha Agaasimayaasha ku Meelgaarka ah lana bilaabo xubno qorida. Hadafku waa in laga dhigo in maalgelintayada koowaadi ay bilaabanto aakhirka 2021 ama horaanta 2021.

Iskaashatadu waxa ay ka gadan doontaa dhul ganaci xaafada Midway. Xadadku deegaanka dhulka laga gadayaana waa wixii Koonfur ka xigga 94, iyo Waqooyiga wadada Pierce Butler, Galbeedka wadada Transfer iyo Bariga wadada Lexington.

## XAGGEE

## SABAB- TA

Hadafyada iskaashatadu waxaa ku jira: kordhintaa maamulida dadka deegaanka ee dhulka ganacsiga ah, ka hortaggida barabixinta ganacsiyada deegaanka iyo soo jiidashada ganacsiyo cusub oo ay beeshu cadaysay inay u baahan tahay.

Iskaashatadu waxay isku keeni dhaqaalaha loo baahan yahay iyadoo gadaysa saamiyo xubinimo waxa ayna u adeegsan doonaa dhaqaalahaa inay ku maalgeliso ugu gadasho dhul ganaci ah si waafaqsan hadafyada iskaashatada. Xubnahu waxaa laga yaabaa inay faa'iido uga soo noqoto lacagta maalgelintooda iyadoo taasi ku salaysan mar walba sida uu barnaamijku lacag u sameeyo.

## SIDDEE



# Su'aalaha inta badan la Is Waydiiyo

## Waa maxay macnaha xubnimada iskaashatadu?

Xubnaha iskaashatadu waxay ay yeelan doonaan **awood codeyn oo siman** waxay ayna ka kasban faa'iido is-le'eg saamiyada xubnimada iyadoo ku salaysan hadba koolaha ay xubantu maalgeliso.

## Intee ayuu yahay kharashka xubnimadu xaggee se ayey lacagtu aadaa?

In kastoo aan wali la go'aansan taa, lacagta xubnimada ka soo baxda waxaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo kaharaashka la xiriira gadashada iyo hagaajinta dhulalka ay u xushaan in la soo gato Golaha Agaasimayaashu. Maalgelinta iskaashatada waxay ay noqon mid **cid walbaa ay ku jirto** waxaana jira xeelado u ogolaanaya dadku inay noqdaan xubno ka mid ah iskaashatada ha awoodaan inay bixiyaan kharashka xubnimada ama yeysan awoodine.

## Siddee ayaa go'aanada loo gaari?

Golaha aasaasayaasha ah waxaa dooran doona Gudiga Dhaqangelinta. Xubnaha golaha ee mustaqbalka waxaa dooran doona xubnaha. Golahu waxa uu hubin doonaa in iskaashatadu ay ku socoto **tubta hafadyada barnaamijka** halka ay xubnuhuna ka hubinayaan in falalka golahu ay yihii **kuwa waafaqsan qasdiga iyo qiiimaha xubnaha.**

## Goorma iyo Siddee ayaa loo xulan doonaa rugta?

Xulashada rugaha ee kama dambaysta ah waxaa falanqeeya go'aansadana Xubnaha Golaha Agaasimayaasha ee la doortay iyadoo ayna si **weyn gacan ugu leedadhey beeshaa** deegaanku.

## Waa maxay talaabooyinka xigaa?

Gudiga Dhaqangelinta ee ka kooban xubnaha bulshada waxa uu hadda ku jiraa dhamaynta hawsha ganacsiga iyo qorshaha hawlgalka, abuurida iskaashi gaar isu taaga, iyo abaabulida hawsha qorida xubnaha. **Hadda waxaan u baahan nahay oraahdaada!**

**MARI KOODKA HALKAN SI AAD ISUGU QORTO INAAD HESHO  
WIXII**

**AKHBAAR AH EE SOO CUSBOONAADA MUSTAQBALKA**

**WIXII KALE EE AKBAAR AH BOOQO:**

[WWW.MIDWAYINVESTMENTCOOP.ORG](http://WWW.MIDWAYINVESTMENTCOOP.ORG)

**Su'aalo? La xiriir Alec Armon ee ururka Hamline Midway Coalition:  
armon@hamlinemidway.org / 651-494-7683**

